Ujeedada ***PATIENSÄKERHETSLAGEN*** [Xeerka amaanka bukaan-socodka] waxay tahay in sare loogu qaado heerka amaanka daryeel-caafimdaadeedka, iyadoo shuruudaha xarumaha daryeel-caafimdaadeedka saaran lagu adkeeyo. Waa in laga hortaga halista, lagana faa'iideysto khibradda bukaan-socodka, taasoo lagu hagaajin karo dhaqadhaqaaqa daryeelka. Waxaa aad loogu mahadcelinayaa bukaan-socodka kaalin wayn oo an qabyo ahayn ka qaatay baaritaanka dhaawaca loo geeystay. Khibradda bukaan-socodka waa arrin aad muhim u ah. Wixii aragti ah ama su'aallo ah toos ayaa nalaga soo xiriiri kartaan.

# ADIGA OO DHAAWAC KA SOO GAARAY DARYEEL-CAAFIMDAADEEDKA.

**Markii dhacdoon lagu talogelin ay dhaco, waxaa ku dadaalnaa sidii an ku caawini lahayn oo ku taageero ku siin lahayn. Naga guddoon warbixin ku saabsan mas'uuliyada naga saaran dhawaacyada daryeel-caafimdaadeedka, iyo xuquuqda aad leedahay sida hadba ku xusan Xeerka amaanka bukaan-socodka.**

## WAXAAN KA XUN NAHAY DHIBAATADA KU SOO GAARTAY.

Anagu ballan-qaadkayga waxaa weeyaan helida daryeel-caafimdaadeedka amaan leh oo sugan, laaakinse nasiibxummo qalad wuu dhici karaa. Wax alle wixii awoodayda ah ayaan kugu caawini doona iyo in dhacdoonkan oo kale oo mar kale dhicin. Ugu horeenti waa in hab sax ah dhawaacaaga wax looga qabto, lagu daaweeya. Isla markaas waxaan ku dhaqaaqi doona arrinbaaris sidii wax u dhaceen iyo sidii wax looga qaban lahaa. Inaad na wargeliso sidii wax u dhaceen waa arrin muhim noo ah. Teeda kale, qoraalka baaritaanka waad akhrisan kartaa. Anaga waxaa na xilsaaran inaad hesho warbixinta dhacdoonka an qabyo ahayn. Waxaan heegan u nahay in su'aalahaaga ka jawaabno. Waxaan kaloo ka caawini karnaa sidii aad xiriir u la yeelan lahayd daryeel-caafimdaadeedka cusub. Arrintan anagu waxay noo tahay arrin tixgelin iyo xilkasnimada xirfada ku salaysan.

## WARBIXIN MUHIM AH KU SAABSAN XUQUUQDAADA:

*Sidatan ayaa caabashada noo wargelin kartaa.*

Haddii aadan ku qanacsanayn baaritaankii an samaynay iyo waxkabadyadii an ku dhaqaaqnay waxaad qoraal caabasho u qori kartaa *Socialstyrelsen* [Goleha arrimaha bulshada]. Goleha ayaa qaabilaayo, baarayo waxna ka qabanaayo caabashadaada. *Socialstyrelsen* wuxuu camaabarayn karaa qof kamid ah hawlwadenyada daryeel-caafimdaadeedka , ka codsan kara bixiyeha daryeel-caafimdaadeedka in waxkaqabad ku dhaqaaqo iwm. Adiga u ma baahnid inaad ogaato sida wax loo haleeyay iyo qofka wax haleeyay, waxaa kugu filan inaad dacwada soo gudbiso (warbixin dheeraad ah ka akhriso bogga Internetka ee *socialstyrelsen.se*).

*Waxaa dhici karto inaad magdhow xaq u leedahay*

1. Caymiska bukaan-socodka: Haddii bukaan-socodka dhaawac loo geeysto kadib markii u xiriir la yeeshay daryeelka caafimaadka iyo bukeha ama daryeel-caafimdaadeedka ilkaha waxaad sida habdba ku xusan xeerka caymiska bukaan-socodka codsan kartaa in magdhow lagu siiyo. Wargelinta dacwada adiga ayaa go'aan ka gaari karo. Haddii aad caawinaad u bahan tahay arrintaas waan ka caawini karna.
2. Caymiska daawada: Haddii daawooyin ay ku waxyeelaan, waxaad xaq u leedahay inaad la xiriirto Caymiska daawada oo ka codsato in caabashadaada laga arrinsato. Waa caymis ku salaysan heshiis ikhtiyaaari ah oo dhexmaray shirkadaha daawooyinka sameeyaan ee dalka Iswiidan.

*Waxaad la xiriiri kartaa Guddiga bukaan-socodka.*

Haddii aadan doonayn inaad xiriir la yeelato daryeel-caafimdaadeedka, oo weli aan ku qanacsanayn daryeelka oona doonayso inaad aragtidaada soo gudbiso, waxaad la xiriiri kartaa mid kamid ah guddiyada bukaan-socodyada gobolka *Västra Götalandsregionen* kuwaasoo tiradood afar ah. Dhammaan dadyoowga ama xubnaha guddiyada bukaan-socodka waxay tixgeliyaan sirta xirfada, marna ha ka walwalin in arrin adiga kugu saabsan in cid kale looga sheekeeyo iyadoo horranteeda ruqsad laga soo qaadan.

## KHIBRDADAADA WAXAY WAXTAR U NOQON KARTAA DADYOOW KALE.

Qofka daryeel-caafimdaadeedka ku waxyeelmay waa qof dhibane ah oo ku sugan xaalad culus. Iyadoo sidaasi tahay, ayaa haddii haddana aad awoodo inaad ka qaybqaadato baaritaanka wixii dhacay, wuxuu falkaas noqoonayaa gacan ka geeysasho aad u wanaagsan. Aragtida aad ka qabto sidii wax u dhaceen iyo sida anaga kula dhaqan nay waa warbixin aad anaga muhim noogu ah, an ku heli karno muqaalka dhacdoonka cad. Taasi waxay noo suurtagelin doonta ka hortegidda in dhacdoon noocaan ah usan mar kale dhicin. Sidaasna dhammaanteen an ku helno daryeel-caafimdaadeed amaankiisa heer sare ah.

## NALA SOO XIRIIR.

Anaga oo mas’uul ka ah daryee-caafimdaadeed- kaaaga waxaan had iyo jeer heegan u nahay in su’aalahaaga an ka jawaabno, taageero ku siinno oo an hubsanno inaad heshay caawinaadi aad u baahnayd. Waxaad kalo la xiriiri kartaa guddiga bukaan-socodka: Borås: 033-17 48 50, Göteborg: 031-63 70 10, Mariestad: 0501-621 80 iyo Uddevalla: 0522-67 08 60.

## MA U BAAHAN TAHAY WARBIXIN DHEERAAD AH?

Warbixin dheeraad ah waxaad ka heli kartaa haddii aad booqato bogga Internetka 1177.se/vastra-gotaland (Riix **Regler och rättigheter**)Nidaamka iyo xuquuqda.

### WIXII KALE